

Dokumentiyeen Cusub



Iyadoo ay qayb katahay mashruuca uu maalgaliyay **Midowga Yurub Xafiiskiisa Gargaarka Biniadinimo**, UNHCR waxay **howl galindoontaa shaqaale dheeri ah** si ay u fuliyaan diiwangalin, bixiyaan dokumentiyeen, iyo fulinta go'aaminta aqoonsiga qaxootinimo.



Aqoonsi (ID) cusub ayaa dhawan la siin doonaa shakhsiyaadka ka diiwaan gashan UNHCR Indonesia – **Kaar isku mid ah ayaa loo wada sameen doonaa qaxootiga iyo magangalyo doonkaba.** Kaarkaaga ama shahaadadaada waxay ahaanayaan mid shaqeeya inta aad ka halayso karaka cusub.

Meelaha dib udajintu Aad ayay Uxadidanyihiin



Dib u dajin **maaha xaq otomaatik ah oo diyaar u ah qaxootiga dhammaantood.**



Haatan waxaa jira in kabadan **22 million** oo qaxooti aduunkoo idil kubaahsan, wadamaduna **in ka yar 1% ayey dib udajin uqaataan** sanad walba.



Meelaha dib udajintu waa kuwa aad u xadidan sidaa daraadeed **inta badan qaxootiga kusugan Indonesia kama faa'iidaysan doonaan dib u dajin.**



Tirada meelaha dib udajineed ee loo qoondeeyay Indonesia **waxaa go'aankeeda leh wadamada dib udajin ta** – maaha UNHCR.



Maadama meelaha dib u dajintu ay xadidanyihiin, **mudnaanta waa in la siiya dadka ugu liita** ee qaxootiga ka mid ah.



Dherarka mudada qaxooti uu daganaa Indonesia **maaha mid la tixgalinayo** marka qof loo ictibaarayo dib u dajin.



Haddii **qof magangalyo doon ah** la ogaado inuu yahay qof liita una baahan dib udajin, **UNHCR waxay fulin doontaa go'aaminta aqoonsiga qaxootinimo** iyadoo ku saleen doonta sida loo kala mudanyahay inta eeysan gudbin kahor.



Haddii aad ku leedahay **qoys wadan sadexaad** waxay utagi karaan dowladooda si ay u helaan xog ku saabsan khiyaarada suurta galka ah **oo ay kugu wakiilan karaan adiga iyo qoyskaaga.** Wadamada badankoodu waxay leeyihiin barnaamij caynkaas ah, hase ahaatee wadanba wadanka kale waa uga duwanyahay shuruudaha sharci uheesasho. UNHCR qayb kama aha wixii wakiilasho gaar ah, hase ahaatee waxaan bixin karnaa tallooyin ku saabsan fursadahan.

Xalal Kale



Maadama **meelaha dib u dajintu ay aad u xadidan yihiin** Indoneisa gudeheeda waxaa suuro gal ah xalal kale inay jiraan, oo ay ku jirto **ku noqoshada dalkaaga** haddii aad is leedahay si ammaan ah baad ku sameenkarta.



Kala xiriir UNHCR **xogta iyo marxladaha haatan jira** ee kusaabsan ku noqoshaha dalka asal ahaan aad kasoo jeedo iyo inaad kala hadasho **khiyaarada jira.** Dhammaan noqoshooyinku waa mid gabi ahaanba ah **go'aan iskaa ah.**

Udiyaargarow Mustaqbalkaaga




Maadama ay **xadidan tahay meelaha dib udajin** ee lagaga baxayo indoensia, diiradda saar **facaliyaadka nuxurka usameen kara noloshada.**



Adeegso **mawaahibtaada** gaarka ah iyo **xirfadahaaga** adigoo si tabaruc ah **ukaalmeeya qaxootiga kale** iyo **bulshada ku marti galisay.**



Kaqayb gal **isbortiga** iyo **nashaadaadka kale ee ijabiga ah.**



Baro luuqada **Bahasa Indonesia** si aad ula tacaamusho dadka reer Indonesia ee kugusoo dhaweeyay bulshadooda.



Kaqayb gal **munaasabadaha dhaqanka ee Indonesia.**



Uga faa'iidee **fursadaha waxbarsho** naftaada iyo qoyskaagaba.



Iska qor **barnaamijyada tababarka xirfadeed** iyo duruusta **jaamacadeed** ee kabaxa barta internet-ka.



Baahi xirfadahaaga iyo khiyadaada adigoo adeegsanaya **tababaro shaqo iyo carbisyo shaqo.**



Had iyo goor **ixтираam shuruucda iyo dhaqamada Indonesia,** xasuusnowna in aad **marti ku tahay wadankan.**